



Maajo 1, 2020

Waalidiinta/Masuuliyiinta iyo Qoysaska qaaliga ahow,

Ayada oo ay qayb ka tahay dadaalada lagu joojinayo faafitaanka COVID-19, xirnaanshaha dhammaan dugsiyada ay dowladdu maal-galiso ee gudaha Ontario waxaa la kordhiyay ugu yaraan ilaa Maajo 31, 2020. Ayada oo xirnaanshahaan uu yahay mid caqabad iyo jaahwareer leh, waxaan rabaa in aan fursaddaan u qaato in aan idin kaga mahad celiyo aanna xuso sida aan mahad balaaran uga hayno in waalidiinta iyo qoysasku noo noqdaan jaalleyaasha waxbarashada.

Waxaan ognahay in aysan shaqo fudud ahayn ku taageeridda canuggiinna (carruurtiinna) barashada internet-ka laga qaato taasoo ay dheertahay masuuliyadaha dheeriga ah ee laga yaabo in aad wajahayso inta lagu guda jiro waqtigaan. Khibraddaanu wey ku cusub tahay qof walba. Waan isla baranaynaa maalin waqtiyada kamid ah. Inta aan qabanayno shaqadaan, waxaan rabaa in aan ku xoojiyo waalidiinta iyo qoysaska in inta lagu jiro xaaladahaan aan caadiga ahayn, aanaan rajeynayn in ardaydu ka qayb galaan maalin dugsiyeed buuxa ama in fursadaha barasho ee ay macalimiintu bixinayaan ay noqdaan kuwo ka turjumaya fasalka caadiga ah ee la fariisto maalin kasta.

[Wargaddaan ugu danbeysa ee waalidiinta loo diray](#), Wasiirka Waxbarashada Stephen Lecce waxa uu ku wadaagay macluumaad dheeri ah oo ku saabsan barashada internet-ka ah iyo rajooyinka shaqo waqtiyeedka asbuuca. Barayaashayada TDSB waxaa ka go'an in ay ku buuxiyaan rajooyinka qaabab kala duwan. Anaga oo la jirna jaalleyaashanada ururka, waxaan eegaynaa qaabab lagu sahmiyo sida barayaashu u isticmaalayaan baraha barashada khadka internet-ka ah si ay usii ilaaliyaan xiriirka ardayda, si aan si wanaagsan ugu taageerno.

Barayaashu waxay la xiriiri doonaan ardayda iyo qoysaska si ay u buuxiyaan baahiyahooda iyo baahida arday kasta oo fasalka ku jira. Tani waxay u muuqan doontaa mid kala duwan fasal ka fasal, macalin ka macalin, iyo calaa arday iyo calaa qoys. Waxaan u baahanahay in aan ka fikirno aanna ka garowno xaaladaha kala duwan iyo marxaladaha qoysaska iyo ardaydeena. Ardaydeenu waxa ay leeyihiin deegaano ay wax ku bartaan guriga oo gooni ah kaa soo leh taageero heerar kala duwan ah taasoo u diyaar ah. Waxa hadda muhiimka ah ayaa ah in aan sii wadno in aan qalqaalinno dhammaan ardayda aanna diiradda saarno caafimaadka iyo badqabka ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska, aanna taageerno guri wax ku barashada.

Sida aan ka dhursugayno, waxaan jeclaan lahayn in aan idin siinno macluumaadka goobo kala duwan si ay idin kaga caawiso in aad u diyaar garowdaan aadna qorshaysaan maalmaha iyo asbuucyada soo socda. Fadlan sii wada in aad la xiriirtaan macalimiinta iyo bulshada dugsiyiinta iyo in aad isku xirnaantaan midba midka kale. Fadlan ahow mid badqaba oo ilaali naftaada iyo qoyskaaga. Tan waan kuwada jirnaa!

- Xilliyada Barashada ee Waalidiinta/Qoysaska
- Taageeridda, Qiimaynta iyo ka Warbixinta Guulaha Ardayda iyo Bad-qabkooda
- Fikirkaaga ka Dhiibo
- Waxbarashada Khaaska ah ee Internet-ka IPRC/SEPRC/IEP
- Bad-qabka iyo Ka Qaybgalka Ardayda
- Xafladaha Qalinjabinta, Ciyaaraha Xafladaha, iyo Dhacdooyinka kale
- Fursadaha Barasho ee Xagaaga
- Khayraadka Qoysaska ee Luuqadda Faransiiska ayada oo ka dhigan in ay tahay Luuqadda Labaad (French as Second)



Language, FSL)

### **Xilliyada Cusub ee Barashada Waalidiinta/Qoysaska**

Baraha khadka internet-ka ee loogu tala galay barashada internet-ka waa kuwo ku cusub qoysaska qaar waxaana naga go'an in aan kugu taageerno caawimaadda si aad u dhex mushaaxdo deegaankan barasho ee cusub. Xilliyada loogu tala galay barashada oo khaas ah ayaa diyaar ah si ay u bixiyaan dulmar labada ugu waaweyn baraha: Fasallada Google iyo Brightspace.

#### Faahfaahinta Barta Barashada ee Brightspace

Qaybtaan waxay soo bandhigi doontaa Barta Barashada ee Brightspace waxayna dabooli doontaa: sida loo galo iyo sida loo furto waxayna farta ku fiiqi qaar kamid ah muuqaallada ugu waaweyn ee ay isticmaalaan ardayda iyo macalimiintu. Si aad qayb uga noqoto, [bookho websaytka](#) kuna dhufo linkiga ku haboon.

- Isniin, Maajo 4 marka ay tahay 3 galabnimo.
- Talaado, Maajo 5 marka ay tahay 7 galabnimo.

#### Faahfaahinta Fasalka Google

Qaybtaan waxay soo bandhigi doontaa Fasalka Google waxayna dabooli doontaa: sida loo galo iyo sida loo furto waxayna farta ku fiiqi qaar kamid ah muuqaallada ugu waaweyn ee ay isticmaalaan ardayda iyo macalimiintu. Si aad qayb uga noqoto, [bookho websaytka](#) kuna dhufo linkiga ku haboon.

- Talaado, Maajo 5 marka ay tahay 3 galabnimo.
- Arbaco, Maajo 6 marka ay tahay 7 galabnimo.

### **Bad-qabka iyo Ka Qaybgalka Ardayda**

Muhiimaddayada koowaad waa in aan taageeranaa aanna sare u qaadnaa [caafimaadka maskaxeed iyo bad-qabka](#) dhammaan ardayda, shaqaalaha iyo waalidiinta/qoysaska. Shaqaalaha dugsigu waxa uu sii joogtaynayaa xiriirka wuxuuna diiradda saarayaa caafimaadka maskaxda iyo bad-qabka ardayda marka ay bixinayaan barashada internet-ka. Macalimiintu waxa ay isticmaalayaan habab dhowr ah oo farsamaysan, si ay ula xiriiraan ulana tacaamulaan ardayda.

### **Taageeridda, Qiimaynta iyo ka Warbixinta Guulaha Ardayda iyo Bad-qabkooda**

Kani waa waqti caqabad ku ah qof kasta anagoo si wada jir ah uga shaqaynayna dhinaca dhaqamada aan ardayda ugu horseedayno guusha. Waxaan aqoonsannahay in ay jiraan isu-dheelitirnaan la'aan fara badan oo ka dhex jirta hannaankayaga taasoo saamayn ku leh barashada iyo guusha ardayga. Waxaana kamid ah helitaanka teknoolojiyadda, helitaanka khayraadka, fahamsanaanta codsiyada khadka internet-ka ah, iyo taageerada barashada. Macalimiintu waxay maskaxda ku hayn doonaan caqabadahaan, ayaka oo taageeraya dhammaan ardayda siinayana fursado barasho oo wax ku ool ah kuwaasoo ku xiran manhajka Ontario, taasoo horseedaysa warbixinta dhammaadka sanadka ee Juun.

Waa mid naga go'an in qiimaynta, rog-rogidda, iyo warbixintu ay noqdaan kuwo caddaalad ah, hufan una siman yihiin dhammaan ardaydu diiraddana saari doona koritaanka barashada iyo horumarinta. Sida markastaba ay tahay, haddii aad qabto wax su'aalo ah ama welwel ah, fadlan la xiriir macalinka canuggaaga iyo/ama maamulka. Fadlan aqri [wararka qiimaynta waalidka/qoyska](#) si aad u hesho macluumaad dheeri ah iyo tafaasiil khaas ah oo ku saabsan qiimaynta iyo warbixinta ardayda waxbarashada aasaasiga ah iyo dugsiga sare.





## **Xafladaha Qalinjabinta, Ciyaaraha Xafladaha, iyo Dhacdooyinka kale**

Sida la idinku wargaliyay warqaddii Abriil 14, dhammaan safarradii aqoon kororsi iyo safarradii habeenka la dhaxay waa la baabi iyey inta ka hartay sanad dugsiyeedka. Waxaan rajeynaynay in ay suurto gal noqon doonto in ciyaaraha xafladaha, xafladaha qalin jabinta iyo dhacdooyinka kale ay sii socon doonaan sanadkaan laakiin marka la fiiriyo warbixintii u danbeysay ee ahayd in dugsiyadu sii xirnaan doonaan ugu yaraan ilaa laga gaarayo Maajo 31, tani suurto gal ma noqonayso. Waanu ka xunahay, waxay noqotay in aan baabi`ino ama dib u dhigno dhacdooyinka ugu yaraan ilaa laga gaaro dhammaadka sanad dugsiyeedka. Ayada oo ay wali jiraan hubantiyo la`aan fara badan, dib u muddaynta dhacdooyinka dib loo dhigay waxaa loola tacaamuli doonaa heer dugsi, ayada oo ay ku xiran tahay xaaladaha gudaha. Fadlan ogow in deeqihii waxbarasho ee sidii caadiga ahayd lagu abaalmarin jiray (ardayda) inta lagu guda jiro xafladaha qalinjabinta laga yaabo in ay sii socdaan abaalmarintoodu, ayadoo aqoonsiga rasmiga ah ay dhici doonto waqti danbe.

## **Fikirkaaga ka Dhiibo**

Maadaama aan soo gaarayno dhammaadka bisheeni ugu horreysay ee waxbarashada internet-ka ah, waxaan rabnaa in aan kaa war helno. Maxaa si wanaagsan u shaqeeyay? Maxaan si wanaagsan u shaqayn? Waa maxay talooyinkaagu? Fadlan daqiiqado yar ku qaado in aad nala wadaagto fikirkaaga ku saabsan waxa canuggaagu kala kulmay barashada internet-ka ah. Fikirkaagu muhiim ayuu inoo yahay anaga oo isku dayayna in aan si wanaagsan u fahamno baahiyaha ardayda iyo qoysaskayaga. Nagula soo biir [Ra`yi Isdhaafsigaan](#) si aad codkaaga ugu darsato wada sheekaysiga.

## **Fursadaha Barasho ee Xagaaga**

Tiro xulashooyin ah ayaa la keenay si loogu ogolaado barashada in ay sii socoto dhammaan xagaaga. Fadlan macluumaad dheeri ah ka arag hoos tafaasiil dheeri ahna waxaa lagu siin doonaa asbuucyada soo socda.

### **Barashada khadka Internet-ka ee Dugsiyada Xagaaga ee Waxbarashada Aasaasiga ah ee Isku-darka ah**

Qorshayaal ayaa socda kuwaasoo loogu tala galay dugsiyada khadka internet-ka ee xagaaga si wax looga qabto baahida ka jirta barashada ardayda loona sii wado ka qaybgalka ardayda ilaa Luuliyo. Tafaasiil dheeri ah ayaa diyaar ku noqon karta [bogga websaytka dugsiyada xagaaga](#) usbuucyada soo socda.

Ogow: Barnaamijkaan waxaa loogu yeeraa "Hybrid" ayadoo laqaa yaabo in ay kamid noqdaan deeqaano waxbarasho oo khadka internet-ka ah iyo fasalka caadiga ah ayadoo la tixraacayo haqitaanka Wasaaradda Waxbarashada.

### **Dib-u-kabashada Daynta Waxbarashada Internet-ka ee Xagaaga (Dugsiyada sare)**

Waaxda Waxbarashada Socota waxa ay bixin doontaa Barnaamijka Dib-u-kabashada Waqtiga Xiisadaha ee Waxbarashada Internet-ka oo loogu tala galay ardayda dugsiyada sare ee TDSB Luulyo 6-31. Barnaamijkaan waxa uu badalayaa dugsiyada xagaaga ee fool-ka-foolka (face-to-face) ee 2020 waxaana kujiri doona koorsooyinka dhammaan qaybaha maadooyinka laga bilaabo fasalada 9 ilaa 12, ayadoo diiradda la saarayo koorsooyinka khasabka ah. Bookho [Bogga websaytka Dugsiyada Xagaaga](#) usbuucyada soo socda si aad u hesho macluumaad dheeri ah.

### **Barnaamijka Isku-darka ee Dib-u-kabashada Daynta Waxbarashada Internet-ka ee Xagaaga (Dugsiyada sare)**

Waaxda Waxbarashada Socota waxa ay bixin doontaa Barnaamijka Waqti xiisadeedka ee Barashada Internet-ka ee Xagaaga oo loogu tala galay ardayda dugsiyada sare ee TDSB Luulyo 6-31. Barnaamijkaan waxa uu badalayaa dugsiyada xagaaga ee fool-ka-foolka (face-to-face) ee 2020 waxaana kujiri doona koorsooyinka dhammaan qaybaha maadooyinka laga bilaabo fasalada 9 ilaa 12, ayadoo diiradda la saarayo koorsooyinka khasabka ah. Bookho [Bogga websaytka Dugsiyada Xagaaga](#) usbuucyada soo socda si aad u hesho macluumaad dheeri ah.



Ogow: Barnaamijkaan waxaa loogu yeeraa “Hybrid” ayadoo laqa yaabo in ay kamid noqdaan deegaano waxbarasho oo khadka internet-ka ah iyo fasalka caadiga ah ayadoo la tixraacayo haqitaanka Wasaaradda Waxbarashada.

### **Barnaamijka e-Summer**

barnaamijka e-summer waxa uu socon doonaa Luulyo iyo Agoosto sida ay ahaydba sanadihii hore isdiiwaan galinta koorsooyinka loogu tala galay ardayda TDSB-na waxa ay bilaabantay horaanta Abriil. Koorsooyinku waa kuwo dhammaantood waqtigii loogu tala galay loo dhammaystirayo waxaana kamid ah koorsooyinka lagu barto fasalada 11aad iyo 12aad sidaa si lamid ah fasalka 10aad ee Cilmiga Bulshada iyo Barashada Xirfadaha. Ardayda aan TDSB ahayn waxa ay iska diiwaan galin karaan laga bilaabo Juun koorsooyinka soconaya Agoosto. Macluumaad dhammaystiran oo ku saaban koorsooyinka iyo hanaanka is diiwaan galinta waxaa lagu muujiyay [websaytka e-learning](#).

### **Dugsiga Xagaaga Khadka internet-ka ah ee Waxbarashada Khaaska ah**

Dugsiyada Xagaaga ee loogu tala galay ardayda waxbarashada gaarka ah wuxuu ka sii socon doonaa khadka internet-ka. Ardayda Dugsiga sare ee DHH waxa ay awood u yeelan doonaan in ay helaan waqtiga koorsooyinkooda ee dugsiga sare. Waxaan sidoo kale bixin doonaa dugsiga xagaaga ee DHH oo loogu tala galay ardayda kujira fasalka 1-8. Dugsiga Sare ee Xagaaga ee CTCC sidoo kale waa uu sii socon doonaa si ardaydu ay u helaan dhibcaha xagaaga.

Dugsiga Xagaaga waxa uu sidoo kale siin doonaa ardayda qabta Naafanimada Koritaanka laga bilaabo Fasalada 1 ilaa 12. Macalimiintu waxa ay sii wadi doonaan barashada khadka internet-ka ee horey loo diyaariyay waxayna ku taageeri doonaan ardayda iyo qoysaska fursado waxbarasho oo dheeri ah.

### **Waxbarashada Khaaska ah ee Internet-ka IPRC/SEPRC/IEP**

Wasaaraddu waxa ay ku bixisay tilmaamo dheeraad ah ayada oo taageeraysa ardayda leh baahiyaha khaaska ah ee waxbarasho qoraalkeedii ugu danbeysay ee [Joogtaynta Barashada Ardayda qabta Baahiyaha Waxbarasho ee Khaaska ah iyo Taageerada Caafimaadka Maskaxda](#).

Ayada oo ay sabab u tahay xaaladaha waxbarashada khadka internet-ka ah ee aan horey u dhicin ee hadda jirta, IPRCs iyo SEPRCs ayaa muhiimadda la siiyay si loo hubiyo in baahiyaha degdegga ah la daboolo.

#### **Mudnaan IPRCs iyo SEPRCs:**

- Ardayda ku jirta Rowdada Sare ee ka baxaya Rowdada Caruurta waxbarashada ku dhiban (DK);
- Dhammaan ardayda ka baxaysa Barnaamijka Dhexgalidda Rowdada (Kindergarten Intervention Program, KIP) kuwaasoo ISP loo tixgaliyay;
- Dib u eegista Sanadlaha ah ee Heerka 2aad ee IPRC ee loogu tala galay ardayda hadda ku jirta Barnaamijka Taageerada Degdegga ah ee Waxbarashada Khaaska ah (ISP) oo u baahan kala guur ayaka oo ka wareegaya dugsi una wareegaya mid kale;
- SEPRC waxay kaliya tix galinaysaa ardayda qabta baahiyaha culus ee caafimaad oo kaliya;
- Ardayda kasoo laabanaysa barnaamijka CTCC;
- Ardayda fasalka 3aad kuwaasoo in loo tixgaliyo fasalka 4aad ISP La siiyay (TDSB ardayda diiwaan gashan oo kaliya; SEPRC kuma jirto qaybtaan).



IPRCs waxaa lagu qaban doonaa khadka ayadoo la isticmaalayo Webex ama shir khadka telefoonka ah. Fariin kasta oo iimayl ah oo ku socota waalidiinta/wakiilada taasoo ku lug leh dukumiintiyada wata macluumaad sir ah oo ay ardaydu leeyihiin waxa ay u baahnaan doontaa aqbalaad ka timaadda waalidiinta kahor inta aan fariinta iimayl lagu dirin. Si loo hubiyo ilaalinta macluumaadka loogana hortago jabinta sirta, fariinta iimaylka ah ee ka kooban macluumaadka shakhsiga ee ardayga ayaa lagu qarin doonaa baasweedhna waa lagu ilaalin doonaa. Iimaylka waxaa kamid noqon doonaa ereyga “QARSOODI” (“CONFIDENTIAL”) halka ciwaanka lagu qoro waxaana kujiri doona rasiid akhriin si loo hubiyo in waalidiinta/xanaaneyeyaashu ay heleen iimaylka.

### **Khayraadka Qoysaska ee Luuqadda Faransiiska ayada oo ka dhigan in ay tahay Luuqadda Labaad (French as Second Language, FSL)**

Todobaadkan, Waaxda FSL waxay bilowday [Khayraad FSL oo loogu tala galay Qoysaska Barta Google](#) ee loogu tala galay waalidiinta, wakiilada iyo qoysaska ardayda oo ah barnaamijyo ku qoran Faransiiska oo ah Luuqadda Labaad. Bartu waxay bixinaysa macluumaad ku saabsan sida ardayda loo taageero inta lagu jiro barashada khadka internet-ka ah, taasoo ay kamid yihiin mabaadii`da hagitaanka, ka fikiridda barashada khadka internet-ka ah ee lagu bixiyo barnaamijyada FSL, linkiyada khayraadka, sida guriga loogu taageero, iyo kabadan.

### **Macluumaadka Cusub ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Caafimaadka Dadweynaha ee Toronto**

Ayada oo ay jirto ku dhawaaqista todobaadkaan ee ah in xirnaanshaha dugsiyada lagu kordhin doono ilaa ugu yaraan Maajo 31, 2020, Wasaaradda Waxbarashada iyo Caafimaadka Dadweynaha ee Toronto waxa ay sidoo kale soo saareen warqado ku socda waalidiinta/wakiilada todobaadkan. Fadlan halkaan ka aqriso macluumaadka: [Warqadda Wasaaradda Waxbarashada](#) iyo [Warqadda Caafimaadka Dadweynaha ee Toronto](#).

### **Xiridda Fikradaha**

Waad ku mahadsantahay mar labaad waxyaabaha aad u samaynayso si aad u taageerto sii socoshada barashada. Hadda si aan horey u dhicin ayay lagama maarmaan u tahay iskaashi wanaagsan oo ka dhexeeya dugsiyada iyo guriga. Wax kasta oo aad qaban karto si aad u qalqaaliso canuggaaga (caruurtaada) aadna dugsiyada iyo macalimiintaada ugu xirnaato waxay yeelan kartaa saamayn wanaagsan oo weyn. Dhammaanteen waxaan samaynaynaa intii karaan keena ah anagoo ku jirna xaaladaan waana kaaga mahad naqaynaa dadaalkaaga.

Waxaan sidoo kale rabaa in aan xuso aana garowsado ardaydayda shaqadooda adag iyo u adkaysigooda isbadalkaan. U guuridda barashada khadka internet-ka ah waxay ahayd mid la qabsi uga baahan qof kasta ahna qaab waxbarasho oo aad uga badalan waxa ardaydu ay yaqaaneen. Waxaan maqlay sheekooyin la yaab leh oo ka imaanaya dugsiyada iyo macalimiintayada kuwaasoo ku saabsan arday kasoo dhex baxaysa dhacdada muujinayana dadaal aan caadi ahayn iyo hal-abuur ayaga oo ku jira xaaladaha. Waxa ay cadayn u tahay ardayda iyo qoysaskayaga cajaan`ibka ah ee aan ku haysano TDSB oo dhan. Aad ayaan ugu faraxsanahay qof kasta waxaana ogahay in haddii aan isla shaqayno aan ka gudbi karno waqtigaan adag.

Fikirka ugu danbeeya ee aan idinla wadaagayo ayaa ah kaliya balanqaad yar oo ah in aan mar horeba ka fikirayno qorshaynta qaabka ugu wanaagsan ee aan ugu laaban karno dugsiyada. Ayada oo aannan ogayn goorta ay arintaanu dhici doonto, waxay noqon doontaa mid muhiim ah lagama maarmaan u ah in aan si iskaashi ah ula shaqayno Caafimaadka Dadweynaha Toronto iyo Wasaaradda Waxbarashada si aan u hubino in tilaabooyinka caafimaad ee ku haboon iyo bad-qabku ay meel yaalaan. Marlabaad, tani waa meel ku cusub oo uusan horey u arag qofkasta waana ka shaqayn doonaa anagoo raacayna hagitaanka ku haboon ee ka imaanaya saraakiisha caafimaadka dadweynaha sidaa si lamid ah dadaalka qiimaha leh ee shaqaalaha iyo dadka kale.





Fadlan caafimaad iyo bad-qab ku joog.

Si daacad ah,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "John Malloy".

John Malloy  
Director of Education

